
# SHUKRAN MALAYSIA

## QISADII HORUMARKA MALAYSIA IYO CASHARRADA SOOMAALI UGU SUGAN



9595
DH

SH. MOHAMED IDRIS

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

2/2/2025
TUN
FCC

# Shukran Malaysia

## (Thank You Malaysia)

(The Story of Malaysian Transformation
& the Lessons for Somalia)

***Qisadii Horumarka Malaysia iyo
Casharrada Soomaali ugu Sugan***

To
Tun Dr. Mahathir
Mohamad
Mohamed Idris
7/9/2023

**SH. MOHAMED IDRIS**

YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA * PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION *
PUSTAKA PERDANA
1013585
PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Copyright © 2009 by Sh. Mohamed Idris Ahmed

All rights reserved. No part of this book may be reproduced or transmitted in any form or by any means without written permission from the author.

ISBN

Printed in Turkey

320.9595
MOH

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

# NUXURKA

**Gogoldhig** .................................................................................. 1

**Hordhaca** ....................................................................................... 9

**Cutubka 1aad:** Horumarka Dadka & Dalalka ...................... 16

**Cutubka 2aad:** Is beddelkii iyo Horumarkii Malaysia ......... 33

**Cutubka 3aad:** Dr. Mahathir Bin Mohamed
- iyo Horumarka Malaysia ................................................... 36

**Cutubka 4aad:** Casharada Hogaaminta iyo Horumarka
ee aan Qisada Malaysia ka baran karno ............................ 49

**Cutubka 5aad:** Soomaaliya iyo Adduunka..
Soomaaliya iyo Malaysia ..................................................... 70

**Cutubka 6aad:** Taxanihii Qoraallada aan Malaysia
ka qoray 2006 .......................................................................... 74

**Gunaanad & Mahadnaq:** Iyo sidii ay uga fal celiyeen
taxanaha dadka akhristay qaarkood ................................ 113

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

PERDANA
LEADERSHIP
FOUNDATION
YAYASAN
KEPIMPINAN
PERDANA

# GOGOLDHIG

## Maxaan wax uga qoreynnaa Malaysia?

Mahad oo dhan Ilaahay bey u sugnaatay, Nabad iyo Naxariisina Nebigeenna korkiisa ha ahaato, Mahad naqaas ka dib,

Dalalka adduunku xiriirkooda dalalka kale wexey ku cabbiraan inta ay dan wadaagaan, ama wadaagi karaan, aqoon, nabad gelyo, bulsho, dhaqaale iyo sanco.

Taasi wexey gundhig u noqotaa inta ay wada shaqayn iyo is kaashi yeelanayaan ama hor tebinta xiriirkooda ku salaynayaan. Waayo in ka badan laba boqol oo dawladood si isku mid ah ulama wada xiriiri kartid.

Marka istaraatiijiyadaas xiriirrada danahaaga ku qotoma kuu caddahay, wexey saamayn ku yeelaneysaa, sida xiriirrada aad u qorshayso, safaarradaha iyo danjirayaasha aad kala direyso, safarrada masuulinta ay dibadaha ku aadayaan gaar ahaan madaxda sare, iyo isu socodka muwaadiniinta dalalka aad la leedahay.

Marka dal uu yahay mid tabar yar ama soo koraya ama ka soo kabanaya dhibaatooyin dagaal iyo burbur dawladnimo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

- sida soomaaliya - waxa qorshihiisa mudnaanta lihi noqdaa - ama la rabaa in uu noqdo - sida uu muddo gaaban Ku gaadhi karo horumar dhinacyada kala duwan sida dhaqaalaha, bulshada, aqoonta iyo teknoolojiga, sancada iyo difaaca, iyo waxa la midka ah.

Haddii qorshahaasu mudnaanta leeyahayna waxaa dalka noocaas ahi xiriirradiisa ku dhisaa cid walba oo ay iska kaashan karaan fulinta iyo ka mira dhalinta qorshahaas, iyaga oo danaha ay kala leeyihiin is weydaarsanaya, sida adduunku u wada dhaqmo.

Haddii arrinkaas annaga oo maanka ku haynna aan soomaaliya ku cabbirno, waxaa markiiba noo muuqan kara soomaaliya in ay tahay dal xilliga maanta la joogo tabar yari hayso dhan walba oo dawladnimada ah, isla markaana ay masuuliinteeda u noqoto istraatiijiyad ay ku hawl galaan in ay u fiirsadaan oo xiriir dhow la yeeshaan dalalka ay is leeyihiin wax badan baad ka faa'iidi kartaan iyana idinka faa'iidi karaan, si dhab ahna wey ka caawin karaan soomaaliya dhinacyada ay maanta u dhutineyso si ay adduunku heerarka uu marayo u gaarto ugana qayb qaadato.

Dalalka aan is leeyahay soomaaliya istraatiiji ahaan wax badan bey ka ka faa'iidi kartaa ha noqoto dhanka awoodda ciidan, ama dhaqaale, ama caafimaad, ama wax barasho, ama shaqo, ama horumar kaabayaal dhaqaale, waxaa



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

aragtidayda ka mid ah: Malaysia, Turkiga, Koonfur Afrika, Indonesia, Pakistaan, iyo Dalalka khaliijka Carabta.

Danaha guud marka laga eegana waxaa soo geli kara: Japan, China, South Korea, Taiwan, Singapore iyo kuwo kale. Ka dibna cid walba oo ama siyaasad ama dhaqaale ama xiriir guud (public relation) aan la yeelan karno ama naga dhexayso.

Qaarkood waxaa laga faa'iidi karaa aqoon iyo sanco iyo waaya aragnimo, qaarkoodna dhaqaale iyo maal gelin iyo kaalmada lacagta cad, qaarkood teknolojiga iyo ganacsiga, qaarkoodna kaabayaal dhaqaale sida loo hormariyo, qaarkoodna amni iyo ciidan iyo tababar wixii ku saabsan.

Sidaas awgeed ayuu buuggan "Shukran Malaysia - Qisadii Horumarka Malaysia iyo casharada Soomaali ugu sugan" ka mid yahay qoraallada ku qotoma baraarujinta in aynu xoojinno xiriirka dalalka aynu si dhaqsi ah horumarka aynu higsanayno la kaashan karno, si hagar la'aan ahna ka fileyno in ay innagala shaqayn karaan in aan caqabadaha inna hor taagan ka gudubno.

Waana midda keentay in aan buug kalena ka qoro Turkiga iyo horumarkiisa iyo waxa laga baran karo, koon furta afrika iyo xiriirkeeda waxa laga faa'iidi karo, iyada oo weliba abaal weyn soomaaliya u gashay xilligii ay halganka ugu jireen la dagaallanka taliskii midab takoorka ee dalkaas ka jirey.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Tusaale waxa kuugu filan garoonka diyaaradaha ee dalkaas ugu weyn ee Johannesburg waxaa loogu magac daray hoggaamiyihii ururka ANC markii uu Mandella xabsiga dheer ku jirey ee la oran jirey Oliver Tampo.

Wuxuu ii sheegay sarkaal sare oo ka tirsanaa xooggii dalka soomaaliyeed in Oliver Tampo Muqdisha yimi 1975 isagana looga dhigay sarkaalka weheliya ee arrimaha u fududeeya muddadii uu joogey soomaaliya.

Maalintii uu baxayey ayuu wuxuu ii dhiibey buu yiri laba sawir oo uu yiri: waxaan u rabnaa baasaboorro in loo soo sameeyo.

Taliyihii hawshaas qaabilsanaa ayaa warqad u qoray laantii socdaalka kana codsaday in labada baasaboor ee nimankaas ANC ah si dhaqsi ah loo soo sameeyo. Isla maalinkii ayaan baasaboorradii u soo dhameeyey, subixii dambana garoonka Muqdisho ayaan ku sagootiyey.

Markii aan sagootinayey ayuu yiri: Dalal badan baa mucaawano noo fidiya, laakiin laba dal keliya ay soomaaliya midkood tahay ayaa baasaboorro aanu adduunka ku marno na siiya, markii aanu gobannimada qaadannana waad noo imaan doontaan adiga iyo ragga kula midka ah.

Ninkaas Oliver Tampo ma soo gaadhin gurashadii miraha halganka oo markii Mandella la soo daayey ayuu dalka sweden ku dhintay.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Hayeeshee madaxdii ANC ee dalka ka taliyey sida Mandela, Thabo Mbeki, Jacob Zuma dhammaan wexey qirsanaayeen abaalka soomaalidu u gashay, wexeyna diyaar u ahaayeen in ay u gudaan, laakiin soomaalida ayaa ka faa'iidaysan weydey, taasina waa sheeko aan xogteeda meel kale ku sheegi doono inshallah.

Waxaan halkan ku sheegi karaa oo keliya laba madaxweyne oo soo maray intii dawladnimada buuxda naloo aqoonsaday oo ku meel gaarka aan ka baxnay, wexey gabeen in ay Malaysia iyo South Africa soomaaliya dhinacya badan uga faa'iideeyaan, safarrada ugu badanna wexey ku bixiyeen meelo aan (sagaaro biya ka cabbin) iska daa in dan soomaaliyeed oo mug leh laga helo.

Balse waxaaba dhacday iyada oo dawladda malaysia oo dhammi soomaaliya u diyaar garowdey, oo booqasho labada madax ee ugu sarreeya midkood tago loo diyaar garoobey, in soomaaliya ay safartii baajisay, mar kalena aaney tegin, sidaas oo kalena koonfur afrika oo u diyaar garowdey madaxda u sarraysa soomaaliya, oo macaamil gaar ah siisay, ay soomaalidu ka baaqdeen, maalmo ka dibna madaxdaas qaarkood wafdi ballaaran ku tageen dalal kale oo aan waxba soomaaliya u soo kordhinayn, arrintaas oo Malaysia iyo koonfur afrika labaduba aad uga xumaadeen, kuna bixisay faylka soomaaliya in ay iska laalaan oo meel kore saaraan, taasna waxaa sababteeda oo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

dhan lahaa madaxdii soomaaliya xilliyadaas ka talineysey oo weliba lagala taliyey arrimahaas istaraatiijiga ah, laakiin aaney dheg u jalaq siin, waana wax taariikhdu qoreyso, faah faahinteeduna aaney halkan ahayn.

Malaysia soomaalida casharro badan ayaa ugu sugan oo ay ugu weyntahay sida dal sabool ah, oo dhaqaale yar, oo dadkiisa aqoontu ku yartahay, muddo gaaban loo beddeli karo, sida siyaasadda adduunka ee danaha is herdinaya leh looga dhex dabaalan karo, adiga oo danta dalkaaga iyo dadkaaga ku mintidaya, sida khibradaha iyo aqoonta teknooloojiga ay dalalku ku hormaraan loo soo amaahan karo, dalalka arrimahaas aad la kaashan kartana xoog loo saari karo.

Tusaale Malaysia markii ay rabtey horumar iyo tababar fiican in ay hesho wuxuu Dr. Mahathir soo hindisey mabda' la yiraahdo (Bariga Fiiri ama look the east) oo macnihiisu yahay in malaysia dawladaha bariga aasiya ee hormaray ay xoogga saarto si ay horumarka aqoonta iyo teknooloojiga uga barato, sida Japan, China, South Korea, Hong kong, iwm, oo aaney isku lurin dawladaha hormaray ee galbeedka waayo wax aan luggooyo ahayn kama faa'iideyso kuwa galbeedka iyo in ay dibudhaca kugu hayaan.

Wana waddadii ay mareen dalalka bariga laftoodu. Japan markii hore Jarmalka ayey ka baratay. Kuuriyada



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Koonfureedna Japan ayey ku dayatay oo ka baratay, markii dambana waa dhaaftay, china markey 1979 soo baraarugteyna Japan iyo Kuuriyada koonfureed iyo Taiwan ayey ku dayatay oo ka baratay, ka dibna waaba dhaaftay, Malaysiana sidoo kale Japan iyo Korea ayey ku dayatay oo wax ka baratay, ilaa waddadaas culimada falanqaysa dhaqaalaha ama wax ka qorta ay ka dhigeen farac cilmiga dhaqaalaha iyo horumarinta ka mid ah oo jaamacadaha lagu barto loona bixiyey: (Hannaan Horumarinta Dawladda ee dalalka bariga aasiya).

Wuxuu Yiri qoraha buugga (China's Economy - Waxa qof waliba u baahanyahay in uu ogaado) - (Arthur R. Kroeber - Oxford University Press 2020) page 4:

" Marka shiinuhu raadinayey moodooyinka horumarka warshadaha iyo tignoolajiyada degdega ah, uma baahnayn in uu meel fog aado. Sannadkii 1979kii Japan waxay hore u soo dhaaftay Jarmalka galbeed si ay u noqoto dhaqaalaha labaad ee adduunka ugu weyn, shirkadaheeduna waxay ku guulaysteen suuqyada caalamiga ah ee baabuurta, birta, kamaradaha, qalabka elektaroonigga ah, iyo alaabo kale oo badan. Ka dib waxaa soo toosay koonfurta Kuuriya, Taiwan, Hong Kong, iyo Singapore, kuwaas oo dhamaantood si degdeg waddada warshadeynta qaaday si hodonnimo ahna u koray. Dhammaan dalalkani waxay qaateen nooc ka mid ah



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

waxyaalihii ay culimadu markii dambe ugu yeedheen: qaabka dawlad-horumarineed ee Bariga Aasiya oo ay dawladda xooggani maal-gashi u gelineyso kaabeyaasha dhaqaalaha iyo wax-soo-saarka dhoofinta". (Buugga China's Economy - Dhaqaalaha Shiinaha - Kroeber 2020 Oxford Univ Press page 4).

Wexey aniga iyo dad ila mid ah ula muuqatey: Madaxda soomaalidu in ay istraatiijiyad ka dhigato: (Look Malaysia, Turkey and South Afrika) fiiri: Malaysia, Turkiga iyo koonfur afrika iyo dalal la mid ah si ay dhibaatooyinka jira deg deg uga soo kabato, laakiin nasiib darro, madaxda indhohoodu wexey aadeen meelo kale oo aan wax dan ah laga dheefin ilaa maantada aan joogno.

Sababtaas ayaa keentay in aan buuggan dib u daabaco, iyadoo dabcaddii hore ahayd 2006, muddadaas dheerna wax badani is beddeleen, malaysiana aan dhawr goor ku noq noqday, wax badan oo arrimeheeda ku saabsanina ii kordheen.

Wabillahi Tawfiiq.

Mohamed Idris
Ankara, May 20, 2023



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

بسم الله الرحمن الرحيم

# HORDHACA

## Daabacaaddii 2aad

Mahad oo dhan Ilaahay baa leh, Nabad iyo Naxariisina Nebigeenna korkiisa ha ahaato.

Buuggan (Casharada Malaysia) asalkiisu wuxuu ahaa dhigaal taxane ah, oo aan ka qoray booqashadaydii u horraysey ee aan ku tegey dalka Malaysia, bishii 3aad Sanadkii 2006.

Qormooyinkaas oo xilligaas ku soo baxay bogga (somalitalk.com) ee barta internetka, ayaa dad badan oo Soomaaliyeed si gaar ah u xiisaynayeen, sida ka muuqatey farriimaha ay i soo gaarsiiyeen. Qaarkoodna wexey ii sheegeen iney la ilmeeyeen marka ay akhrinayeen sida xaalkeennu ahaa xilligaas - welina wax badan yahay - iyo sida dadku dalalkooda uga shaqaynayaan.

Taasu wexey ii caddaysay in qoraalladu saamayn - in kastaba ha leekaatee - ku yeesheen akhristaha soomaaliga ah, waana arrin qoraa kasta dhiirrigelin fiican u noqota oo uu ku farxo in waxa uu qoray saamayn fiican yeeshaan ama la akhriyo.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Haddaba aniga oo ka duulaya talada akhristayaasha qaarkood, iyo tayda gaar ahaaneedba, ayaan qoraalladaas taxanaha ahaa ku daabacay dhigaal yar dabayaaqadii Sanadkii 2006, waxaanan buugaas intiisii badnayd u diray gudaha Soomaaliya, sanqadhiisuna gobollo kala duwan ayey gaadhey, dadka qaar uu gaareyna waa ii soo sheegeen, qaar aanu gaarin oo magiciisa maqlayna wey isoo weydiiyeen.

Hayeeshee, Maadaama muddo 15 sano ka badani ay ka soo wareegatey qoraalladaas, waxaan u arkay iney habboon tahay in aan dib ugu noqdo qoraalladii Malaysia oo berigaas aan ku magacaabay (Shukran Malaysia), oo tifaf tir ku sameeyo waxna ku daro, taa soo ay sababaha soo socdaa ugu wacantahay:

1. Xilligii qoraaladan aan soo bandhigay (2006) ilaa maantadan aan joogno (2021) wax badan ayaa is beddeley Malaysia, Soomaaliya iyo Aduunka guud ahaan.
2. Malaysia waagaas ka dib dhawr goor oo kale ayaan safaro ku tegey, taas oo xog badan oo kale ii kordhisey.
3. Daabacaaddii 1aad oo dhamaatay, dadka qaarna weli i soo weydiiyaan.
4. Xilligaa ka dib waxaa soo baxay qoraallo iyo buugaag tiro badan oo Malaysia ku saabsan xogo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

wax ku ool ahna xambaarsan, waxaana ugu muhimsan - aragtidayda - xusuus qorkii Ra'iisul wasaarihii hore ee Malaysia Dr. Mahathir Bin Mohamed, oo lagu magacaabo (***Aabaha Horumarka Malaysia)***. Xusuus qorkiisaas wuxuu ku magacaabay: (Doctor In The House) ama haddii af soomaali la isku dayo in laga dhigo: (Dhakhtar Galay Madaxtooyada) taas oo wax badan buugga ku kordhin karta.

5. Iyada oo weli ay taagantahay baahida loo qabo in la isku baraarujiyo casharrada laga qaadanayo dalalka iyo dawladaha soo koraya, ama horumar la taaban karo sameeyey muddo gaaban, iyaga oo waqti aan fogayn ku sugnaa duruufo adag xagga dhagaalaha, nolosha bulshadooda, shaqada iyo horumarka, kuwaas oo la mid ah ama ka daran kuwa soomaalidu ku sugan tahay.

Sidaa Awgeed ayaan buugga dib u eegis ku sameeyey, qoraallo cusubna ku daray, ujeedaduna marka la isku soo hooriyo wexey tahay, in aan bidhaamiyo waxa laga baran karo horumarka ay Malaysia gaartey iyo waddadii ay u martay ama sababaha ugu weyn ee muuqda oo ay guulahaas ku hanatay, si ay cashar ugu noqoto dadka Soomaalida ah (dad & dawlad), aqoon yahan iyo indheer



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

garad, cid kasta oo danayneysa in ay horumar u horseeddo nafteeda iyo dadkeeda iyo dalkeeda.

Waxaan kale oo aan si gaar ah qoraallada cusub tilmaama door ah kaga bixiyey (Hoggaaminta Wanaagsan) ama waxa afka qalaad loo yaqaan: (Good Leadership) iyo saamaynta ay ku leedahay horumarka dadka iyo dalalka.

Aniga oo ka duulaya cilmi baarista aan si guud ugu sameeyey arrinka hoggaaminta, muddo 20 sano ka badan, gaar ahaanna hoggaaminta siyaasadeed ee dalka Malaysia, iyo dalalka la midka ah ee lagu tilmaamo in hoggaanka siyaasadeed ee aragtida xambaarsani udub dhexaad u ahaa horumarkooda, sida Malaysia, South Korea, Japan iyo China, Turkiya iyo Brazil, iyo dalal kale oo la mid ah oo dhigaallada adduunka tusaale loogu soo qaato.

Casharada hoggaaminta iyo horumarinta Malaysia waa mid adduunka oo dhan soo jiidatey wax badanna laga qoray, qarnigii 20aad ee tegey. Tusaalena waxaa u ah, qoraal uu mar soo dhigay wargeyska caanka ah ee (Guardian) qoraa ingiriis ah oo arrimaha dhaqaalaha khabiir ku ah uuna ku yiri: ***(Malaysia wexey haysaa Casharro badan oo ay adduun weynaha bari karto).***

Waxaa kale oo tusinaya dhigaallada iyo falanqaynta badan oo adduunku ka qoray, heer qaarkood ku tilmaamaan (**Mucjisada Malaysia**), sidaa awgeed ayaan muddo 15



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

sano ka badan isku taxallujiyey in aan u kuur galo (**Qisada Malaysia**), waxaanan qoraalladan kala soo baxay buugaagta ama qoraallada sida gaarka ah looga qoray dalka iyo dadka Malaysia, guud ahaanna kooxda loo yaqaan (shabeellada Aasiya) ama (Asian Tigers).

Waxaan si gaar ah u soo xiganayaa xusuus qorka Dr. Mahathir Mohamed oo xog iyo duruus badan xambaarsan, ciddii danayneysa sida dal iyo dad loo dhiso loona hormariyo, waxaanan kula talin lahaa qof kasta oo xil bulsho ama qaran ama hammigeed xambaarsan in uu si qota dheer u akhriyo buugga Dr. Mahathir ee aan kor ku soo xusay (**Doctor in the house**) ama (**Dakhtar degey aqalka madaxtooyada**) oo afaf badan loo turjumey, iyo waraysiyada taxanaha ah ee uu weriye Axmed Mansuur - Al jazeera, kula yeeshay Dr. Mahathir, barnaamijka "Markhaatiga Casriga".

Waxaa halkan in aan ku xuso mudan arrin aan xoogaa la yaabay markii hore, laakiin gadaal markaan u fiiriyey aan garawsho u raadiyey, taas oo ah: dalka Malaysia ee uu ka dhacay is beddelka noocaas ah ee dadka qaar mucjisada ku tilmaameen, waxaa 2006 markii iigu horraysey noo joogey arday soomaaliyeed oo 4000 lagu qiyaasay, intii ka dambayseyna kumanyaal kale ayaa tegayey oo wax ka bartay.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Ardaydaas tirada badan oo Malaysia wax ku soo bartay qaar ka mid ahi wexey dalka soomaaliya ka qabteen jagooyin hoggaamin siyaasadeed oo kala duwan, heer dawladda hoose ilaa dawladda sare, heer gobol iyo heer qaran.

Yaabku wuxuu yahay ardaydaasi Malaysia jaamacado kala duwan ayey ka barteen, laakiin kama baran sida dal ama dad loo hormariyo, waayo hoggaamintoodii kama aysan muuqan.

Ardaydaas oo sannado kala duwan dalka Malaysia ku noolaa, waxaad mooddaa in aaney arag ama maqal, ama akhrin, ama u kuur gelin, sidee "Mucjisadan la sheegayaa Malaysia uga hirgashay? Sideese dalalka kale ee dalkeennu ka mid yahay loogaga faa'iidaysan karaa? Taasina sabab u noqotay markii ay dalkooda ku soo noqdeen, xilal sarena ka qabteen, in aaney samayn wax is beddel ah oo muuqda, ama higsanaya mucjisadii ay Malaysia ku soo arkeen.

Ma muuqan in ay si cilmi iyo diraaso ku dhisan u lafa gureen, uguna fiirsadeen waddada ay Dr. Mahathir iyo Saaxiibbadiis u mareen Malaysia in ay ka mid noqoto shabeellada aasiya, maxaa yeelay dalkeenna 20 sano ka badan iyadoo dadkaas Malaysia wax ku soo bartay ay xilalka qaybsanayeen, wax mahathir ama malaysia ku dayda ama tusinaya xitaa in ay higsanayaan kama soo bixin.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Sideedana dadka ummadaha ama dalalka wax ka beddelaa had iyo goor waa dad xambaarsan hammi ummadeed, hammi dal iyo dad, ka weyn hammiga naftooda iyo gurigooda.

Qaybta u dambaysa dhigaalka waxaad ka heli doontaa taxanihii 10 qormo ahaa ee (2006) aan ugu ku magacaabay: (***Shukran Malaysia***), kuna soo baxay rugta somalitalk.com ay ku leedahay barta internetka, haddii aad google ka ka baadi goobtana aad heli karto, iyada iyo dhigaallo kale ee aan xilligaas qoray.

Ilaahay waxan ka baryayaa in uu dhigaalladan Qoraaga iyo Akhristahaba ku anfaco, waxaanan weydiisanayaa qof kasta oo wuxuun ka dheefa inaanu iga Illaawin duco wanaagsan aniga iyo waalidkay iyo ehelkaygaba, wixii qalad ama ilduuf ah ee aad ku aragtaanna ila soo socodsiiya inshallah, si aan daabacadaha dambe uga soxo, inshallahu.

Wabillaahi Tawfiiq..

*Maxamed Idris Axmed*

*Mombasa, Kenya*

*19 Mar, 2018*

*E-mail: shidiriis@gmail.com*



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

## CUTUBKA 1AAD

# HORUMARKA DADKA & DALALKA



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

# Cutubka 1aad
# Horumarka Dadka & Dalalka

Inta aan adduunka safarrada ku marayey 20kii sano ee u dambeysey, waxaan aad ugu kuur gelayey, uguna fiirsanayey, dadka iyo dalalka aan dhex marayo, dhaqankooda, taariikhdooda, is beddeladooda, siyaasaddooda, iyo horumarkooda ama dib u dhocooda, sababaha keenay horumarka haduu horumar jiro, iyo sababaha dib u dhaca keenay hadduu dib u dhac jiro, maa daama wax walba Ilaahay sabab u yeelay.

## Dalalka iyo Ummadaha

Waxaan isku deyi jirey intii awood ah, inaan akhriyo wax kasta oo indhahaygu ku dhacayaan. Dhulka, dhismaha, waddooyinka, buundooyinka, beeraha, xoolaha, birta iyo wershedaha iyo sancada, jaamacadaha, shirkadaha, iyo nidaamka nolosha ee bulshada.

Ka dibna waxaan akhrin jirey intii gacantaydu gaarto buugaag iyo wargeysyo, baaritaanno cilmiya, mid warqadaysan iyo mid aaladaysan labadaba, waxaan mari jirey meelaha kutubta iyo taariikhda lagu kaydiyo, bal si aan wax uga ogaado sababaha dadkaas iyo dalalkaas u horseeday iney hor u mar gaaraan, isla markaana aan is bar



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

bar dhigo xaalkeenna iyo xaalkooda, aniga oo tix gelinaya duruufaha lagu kala duwan yahay.

Marka aan arrimahaas eegayo waxaan ka duulayey oo isku deyayey inaan ka faa'iidaysto aayadda (46aad) ee Suuratu Al-Xaj ku jirta oo lagu macnayn karo:

(***Miyaaney dhulka marin, oo yeelan qalbiyo ay ku caqliyaystaan, ama dhego ay wax ku maqlaan,. Arag la'aantu ma aha indha beelka, ee arag la'aantu waa qalbiga laabta ku jira oo wax arki waaya***).

## Nin aan Dhul Marin Dhaaya ma Leh

Waxaan maray in ka badan 50 dal oo adduunka ka mid ah, ummado kala duwan, waxaan la yaabay bani aadamka Eebbe adduunkan ku beeray sida ay u kala duwanyihiin, dhaqankooda nololeed sida uu u kala fogyahay, shaqadooda, dadaalkooda iyo dal jacaylkooda, jarmaadadooda iyo carrawtimadooda, fekerkooda iyo waxa eebbe siiyey dhul iyo hanti sida ay uga faa'iidaystaan ama uga qatanyihiin.

Soomaaliduna horay ayey ugu maah maahday: (***Nin aan dhul Marin, dhaaya ma eh***). Taas oo nuxurkeedu ama dhuuxeedu yahay qofba intuu dhul maro arlada ayuu ka waaya aragsanyahay qofka aan dhul marin oo aan wax



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

badan arag, hayeeshee waa markuu u dhug yeesho wuxuu arkayo ama maqlayo, ama dhulka uu marayo.

Sidaa awgeed waxaan isku dayaa inaan dhegaha iyo caqliga furo, wax kasta oo dhegahayga iyo aragayga ku dhacayana aan ku fekero, oo isku dayo inaan macnaha iyo murtida, fekerka iyo hawsha ka dambaysa garto intii awood ah.

Laga soo bilaabo 1985 Waxaan cagta mariyey waddama aad u fara badan, waxaanan ku noolaa inta u dhaxaysa ayaamo iyo sannado.

Dalalkaa aan maray waxaa ka mid ah Yurub: Sweden, Norway, Denmark, Finland, Iceland, Ingiriiska, Ireland, Netherland, Belgium, Switzerland, Austria, Germany, Italy, Spain, France.

Dhanka qaaradda maraykanka sida, Maraykan, Canada, Carabahana iyo muslimiintana qaar sida : Sucuudi, Imaaraad, Kuwait, Qatar, Bahrain, Masar, Yaman, Suuriya, Suudaan, Turkiya, pakistan.

Africana sida : Jibouti, Ethiopia, Kenya, Tanzania, Uganda, Zambia, Mozambique, South Africa, Rwanda.

Intaas tusaale ayaan u soo qaatay, waxaana laga yaabaa qaar aan hilmaansanahay ama aan waqtiyaal kooban sida saacado aan maray ama arkay in aanan ku darin.



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Waxaan qiyaasayaa, marka aan intaasba si diraaso iyo cibra qaadasho ay ku jirto aan u eegayey, aniga oo mar walba ka dhex eegaya Qur'aanka iyo Sunnada, iyo taariikhda aadanaha, inaan kala soo bixi karo casharro laga faa'iidaysan karo dadkana aan la wadaagi karo.

### Aadanuhu muuqaalka waa isu egyahay Laakiin!

Dadka dalalkaas ku nooli dhammaan wexey ka siman yihiin abuurka aadane nimada Ilaahay ku abuuray, wexey ka siman yihiin dhulka Eebe Ilma aadan qolaba meel dejiyey, qolaba hanti iyo quud ku filan u dhigay ama ugu aasay dhulkooda.

Wexey ka simanyihiin sidaan horay u tilmaamay aaladaha aqoonta iyo fekerka lagu gaaro oo Eebe Ilma aadan oo dhan u hibeeyey: Aragga, Maqalka iyo Caqliga.

Wexeyse ku kala duwan yihiin sida ay u adeegsadaan aaladaha aqoonta iyo fekerka Eebbe ugu deeqay, shaqada iyo farsamada, kallaxaadda iyo kartida, ay kaga faa'iidaystaan barwaaqada iyo nicmada Ilaahay dhulka dhigay halkaas oo ilma aadan ku kala baxeen, wexey noqdeen 4 qaybood:

1. Qolo wexey u adeegsatey Araga, Maqalka iyo Caqliga sidey Rabbigeed u aqoonsan lahayd uguna hogaansami lahayd, Adduunyadedana si fiican ugu



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

maamulan lahayd, waa qolada ugu fiican, oo adduun iyo aakhiro ayey isku darsadeen. Waa xaaladdii muslimiintu ku sugnaayeen markey diinta si fiican u haysteen.

2. Qolo Wexey u adeegatey sidey adduunyada u maamulan lahayd, Rabbigii abuurayna wey hilmaameen, qoladaasu xoogaa adduunyey heleen aakhirana waa khasaareen, waa sida gaalada sancada adduunka ku hormartay diintana ka tegey.
3. Qolo saddexaad labadii daarood midna kuma guulaysan, diinna ma helin, adduunyana wax kama gaarin, waa kuwa ugu khasaara badan, sida ummada badan oo adduunka gaalnimo iyo dib u dhac isku darsaday.
4. Qolo afraad Rabbi ayey aqoonsadeen, diintii saxa ahaydna wey qaateen, adduunyadii la yiri cammirana wey ka gaabiyeen, oo sidaas shaqadii adduunka naftooda iyo dad kaleba wey ku seegeen, aakhiro diinta xaqqa ah waa ku badbaadayaan, laakiin wixii ay adduunka ka gaabiyeen waa lagala xisaabtamayaa. Waana xaaladda muslimiintu maanta u badantahay kooxdaan u dambaysa.

Qaybahaas afarta ah waxaa si fiican uga hadlay Sh. Cabdilxamiid Bin Baadiis, Caalimkii algeria ahaa ee noolaa (1889-1940). Wuxuuna asaasay sanadkii 1931 (Jamciyaddii



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Culimada Muslimiinta) ee dalka Algeria sabab ugu noqotay iney indhaha u furto, wax barashada iyo dugsiyada aad waddanka ugu faafiso, gumaystihii Ferenjigana in laga hortago oo dalka laga kiciyo sabab ugu noqotay.

Wuxuu ku faah faahiyey tafsiirkiisa Qur'aanka ee goos gooska ah, markuu ka hadlayey bilawga Suuradda 17aad ee (Al-Israa).

**Saacadaha shaqada lagu kala tegey!**

Warbixin ay soo saartay Hay'adda dalalka carabta u qaabilsan arrimaha shaqaalaha iyo hor u marintooda oo lagu soo daabacay wargeyska(Al-khaliij) ee ka soo baxay (Imaaraadka 10/5/2013) wuxuu sheegay:

{Qofka shaqaalahaa ee dalalka carabta inuu yahay kan ugu hooseeya shaqada iyo wax soo saarka dhabta ah, taasoo noqotay cel celis maalinkii: 18 daqiiqo! Markii laga gooyo saacadaha shaqada ee ku luma waxaan qiimaha lahayn. Halka dalalka hormaray qofka shaqaalahaa wax soo saarkiisu yahay: 7 saacadood cel celis. (Sida Japan iyo Jarmalka tusaale ahaan).

Tusaale ahaan warbixintu wexey sheegtay: Qofka shaqaalaha Masriga wax soo saarkiisu inuu yahay: 30 daqiiqo, Algeria: 22 daqiiqo, Suudaaniga: 20 daqiiqo!



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

Waqtiga shaqadu waxyaabaha uu ku lumo waxaa ka mid ah: shaqada oo laga soo daaho, waqti horana laga boxo, taleefan ku hadal, sheekaysi, internet fiir fiirin, baraha bulshada, sigaar cab, shaah iyo cunto, iwm. }.

## Saboolnimada iyo Hodonimada

Waddamadaas qaarkood waxaa lagu tiriyaa kuwa adduunka ugu hodonsan uguna hormarsan, ugu dhaqaale badan, uguna aqoon sarreeya, ugu nolol wacan uguna shaqa badan.

Qaar kalena waxaa lagu tiriyaa kuwa ugu saboolsan adduunka, uguna shaqa yar, ugu dib dhacsan uguna nolol hooseeya.

Qaar kale oo waddamadaas ka mid ahna waxaa lagu tiriyaa kuwa dhex dhexaadka yaal oo xagga sare xiga ama xagga hoose u janjeera.

Taasi la yaab ma laha oo adduunku waa (tilkal ayaam) sida aayad Qur'aanka ku jirtaa innoo macnaysay, oo hodonimada iyo horumarka iyo xooggu aadanaha waa u kaltan oo Ilaahay ayaa qolaba mar u dhiiba.

## Kala Duwanaanshaha Ummadaha

Hayeeshee waxaan shaki ku jirin mid walba inuu Ilaahay sabab u yeelo, horukac iyo dib u dhac, hodonimo iyo



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

saboolnimo, iyada oo tii Ilaahay meesheeda tahay, annaga waxaa nagu aaddan inaan isku dayno in aan garanno, kuwa hodon nimada iyo horumarka adduun gaarey maxaa u sabab ah horumarkooda? kuwa saboolka noqday ee dib u dhacayna maxaa sababay tabar darradooda?

Dhamaantood waa Ilma Aadan, isku si ayey u calool galaan, u tarmaan, u dhashaan, u hana qaadaan, lixaadkooda, midabkooda iyo dhismaha jirkooda waa isku mid, wuxuu Eebe dhamaantood u yeelay: Indho ay wax ku arkaan, Dhego ay wax ku maqlaan, Garaad ay wax ku gartaan.

Si siman ayaa Eebe dhamaantood u dejiyey Cirka hoostiisa iyo dhulka korkiisa, wuxuu u qaybshey deeqdiisa ballaaran mid muuqata iyo mid qarsoon oo in lala soo boxo u baahan, buuro iyo bannaan, beero iyo xoolo, Bad iyo Biyo, Ilo iyo Webiyo, Macdan iyo khayraad kala duwan.

Haddana xaalkoodu waa kaaf iyo kala dheeri, waxaad arkeysaa midkii dhulka baaxadda weyn la siiyey oo kii dhulka ciriiriga ah ku jirey marti u ah, ama qaxooti ugu yimi!

Waxaad arkeysaa midkii cimilada wanaagsan la siiyey ee 12 bilood ee sanadka wax beeran karey oo quudkuu cuni lahaa ka baryaya kii cimilada lagu dhibay ee 3 bilood keliya wax beeranayey!

Waxaad arkaysaa kuwo dhul qarjaf ah oo dabeecad ahaan adag la dejiyey oo habeen iyo maalin ka shaqaynaya,



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA

hagaajinaya, qurxinaya, waddooyin iyo godad buuraha korkooda iyo badaha hoostooda ka jeexaya, iyo kuwo dhul bannaan oo dabeecad fiican la siiyey, oo aan waxba haba yaraatee ka qaban, sidii Ilaahay u abuuray dhulku yahay! iska ag fadhiya, ilaa marar badan kuwa kale hunguri ka galo oo ay wax badan ka dhacaan ama kala wareegaan.

Waxaad arkaysaa qaar kallaxaya aroorta hore, oo dhulka Eebbe siiyey ku faafaya, oo shaqaynaya, iyo qaar kale oo hurda, markey soo toosaanna sheeko iyo maxaa la yiri u fadhiya, shaqana aan qabanayn, sheeko iyo shaxaadka asaagoodna shaqo ka dhigtay.

Waxaad arkeysaa kuwo noloshooda nidaamsaday, kala dambayn iyo ismaqal ku ballamay, qof waliba dantiisa raacanayo, hantidu dadka ka dhexayso haba la kala badsado, iyo qaar kale oo fawdo iyo is garab yaac lagu imtixaanay, hantiduna in yar gacantooda ku jirto inta kalena beerka dhulka ku hayso!

Waxaad arkaysaa kuwo xuquuqdooda raadsanaya oo Ilaashanaya, oo qofkii isku daya inuu ka duudsiyo ama kaga tagri falo iska celinaya, qaar kalena waxaad arkeysaa kan dulmiya ee xaqooda dhaca ee xuquuqda ka duudsiya ayey u heesaan, una sacab tumaan, marar badanna dartiis ayey dantooda iyo noloshooda u waayayaan.

Sida kuwa qabyaaladda lagu imtixaanay ee wax ku qaybsada, oo u dhimanaya una doodaya qof reer hebel ah



PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA



Sh. Mohamed Idris Ahmed wuxuu ku dhashay degmada Qandala, Gobolka Bari, Soomaaliya qiyaasta sanadkii 1957.

Wuxuu tacliinta hoose ilaa sare ku qaatay Qandala, Muqdisho, Cadan dalka Yaman ilaa 1976.

1977 wuxuu tegey dalka Sucuudiga, wuxuuna Qur'aanka Kariimka ah ku xifdiyey Masjidka Xaramka ee Makka, wuxuuna cilmiga sharciga ah ka raacday Culimadii Islaamka ee casrigaas joogtey, waxaana ka mid ahaa: Sh. Ibnu Baaz, Sh. Ibnu Cutheymiin, Sh. Xasan Ayuub, Sh. Sayid Saabiq, Sh. Shariif Cabdinuur, Sh. Cumar Faaruuq, iyo Culimo Kale oo badan.

Wuxuu shahaadada heerka 1aad iyo 2aad ka sameeyey Jaamacadda American Islamic University, Washington DC.

Wuxuu ka qayb qaatay dacwada bulshada Soomaaliyeed gudaha dalka iyo dibaddiisa,

Wuxuu Imaam, Daaci iyo Madaxa Golaha Imaamyada Soomaaliyeed ka noqday dalka Maraykanka, laga bilaabo 1997.

Wuxuu ka qayb qaatay dacwada iyo dhismaha Masaajidda iyo Maraa kista Qurba joogta Soomaaliyeed ee Maraykanka, Canada, Europe iyo Africa, welina uu safarro kala duwan ku bixiyaa.

Wuxuu wacyigelin kaga qayb galay shirar badan oo bulshada soomaaliyeed loo qabto gudaha dalka iyo dibaddiisa, wuxuuna qoray kumanaan maqaallo af carabi iyo soomaali isugu jira, iyo kutub ay mid yihiin: Innaga iyo Xabashida, Sh. Ibnu Baaz, taariikh nololeed kooban, Cajaa'ibta sadaqada, Socdaalka Geerida, Miraha kharaar ee Dagaaladii sokeeye iyo qaranjabkii soomaaliya, qisadii horumarka Malaysia, Damac rag iyo dan reer, Hoggaaminta Erdogan iyo Horumarka Turkiga, Jacaylka Dhabta ahi goormuu dhashaa? Iyo kuwo kale oo badan.

9 780991 273010

PERDANA LEADERSHIP FOUNDATION
YAYASAN KEPIMPINAN PERDANA